



GALMUDUG STATE

War Saxaafadeed

Cadaado, 7da Janaayo 2016

Booqashada Afhayeenkha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cismaan Jawaari uu maanta ku tegay magaalada Dhusamareb waa mid looga gol leeyahay in lagu carqaladeeyo nabadda iyo xasiloonida ka jirta deegaanada Dowlad Goboleedka Galmudug. Waan cambaareynaynaa mana ahan mid u adeegaysa danaha umadda Soomaaliyeed iyo gaar ahaan shacabka Galmudug.

Waxaan u aragnaa in booqashada Afhayeenkha looga gol leeyahay in lagu xagal-daaciyo dadaalada wadahadalada nabadda ee lagu dhixdheyaadinyo Dowlad Goboleedka Galmudug iyo Ahlu Sunnah Waljamaaca oo ay garwadeenka ka yihiin Urur Goboleedka IGAD iyo Beesha Caalamka.

Tilaabada nuucaan ah waxaa looga dan leeyahay in lagu jahawareeriyo umadda Soomaaliyeed, lagu carqaladeeyo nabadda iyo xasiloonida ka jirta deegaanada Dowlad Goboleedka Galmudug, isla markaana lagu dhiciseeyo Hanaanka Doorashada 2016. Waxaan u aragnaa tilaabada uu Afhayeenkku qaadey mid lagu abuurayo qas iyo jahawareer siyaasadeed si loogu qiildayo mudo kororsi waqtiga Baarlamaan, midaas oo Afhayeenkku in mudo ah raadinayey.

Dowlad Goboleedka Galmudug waxay Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Beesha Caalamka xusuusineysaa in tilaabada uu Afhayeenkku qaadey ay tahey mid uu ku gacan maroojinayo Hanaanka Doorashada 2016 isla markaana ka hor imaanaysa Qaraarkii Golaha Amaanka iyo natijjooyinkii ka soo baxey Madasha Wadatisha Qaranka Soomaaliyeed.

Dowlad Goboleedka Galmudug waxay cadeynaysaa in qalqal kasta ee ku yimaada nabadda iyo xasiloonida ka jirta Dowlad Goboleedka Galmudug kana dhasha booqashada Afhayeenkha Baarlamaanka, uu Afhayeenkku masuul ka yahey laguna xisaabtami doono.

Dhamaad